Xogta Waalidka ee FMPSD: Qiimaynta Shaqada ardayga iyo Warbixinta Darajooyinka ugu dambeeya FAQ's

Ujeedada:

• In la dejiyo hagitaanno cad oo joogto ah oo loogu talagalay warbixinta inta lagu jiro xaaladda COVID 19.
• Kuxirida tilmaamaha FMPSD ee ku saabsan warbixinta iyo Alberta Education oo ay ku wehelinayso walaac iyo faham ku saabsan baahida loo qabo in si caddaalad ah loola dhaqmo ardayda iyo wanaagga ardayda, qoysaska iyo shaqaalaha.

Guudmarka Waxbarshada Alberta (Alberta education) iyo aasaaska:

• Fasalada dugsiga mise iskuulka Alberta ayaa la baajiyay bishii Maarso 15, 2020
• Maamulka iyo masuuliinta dugsiga ayaa fidiya fursado waxbarasho guriga dhexdiisa ah oo loogu talagalay Kindergarten ilaa ardayda Fasalka 12 ah khadka tooska ah, koorsooyinka oo lagu bixin doona teleefonka iyo wadahadalka fiidiyowga.
• Macallimiintu waxay go'aaminayaan casharada aasaasiga ah waxayna qorsheenayaan casharro macquul ah oo loga shaqayn karo guriga.
• Waxbarashada Alberta waxay joojisay dhamaan Qiimeynta Degmooyinka fasalada 6, 9 iyo 12.
• Fadlan tixraac Tilmaamaha Waxbarashada ee Alberta ee gaarsiinta ku jira halkan

Tilmaamo:

• Ardayda waxa la siinaya casharro aassaasi ah oo laga maarmin si ay ku guuleystaan fasalka xiga.
• Macallimiintu waxay dejiyeen oo ay la socodsiiyeen habab cad oo loogu talagalay ardayda iyo qoysaska si ay ula xiriiraan macallimiinta si toos ah. Ardayda waxaa la ogaysiin doonaa qaabka ay manhajkooda noqon doono.

FAQ's (su'salo):

1. Iskuulka ma la joojiyay? Maya. Macallimiintu wali waxay qorsheynayaan oo ay wax bari doonaan ardayda.

2. Maxaa ku dhacaya wiilkayga / gabadhayda hadda? Ardayda waxaa la siin doonaa casharada aasaasiga ah sidee ugu guuleystaan fasalka ama koorsada xiga.

3. Sidee buu wiilkaygu / gabadhayda / nafteyda ula xiriiri macalinka? Macallimiintu waxay dejiyeen oo ay hirgeliyeen Hab cad oo isgaadhsiin ah si ay ardayda iyo qoysaska ula xiriiraan macallinka oo u wada hadlaan si toos ah. Ardayda waxaa lagu caawin doona qaabka oo manhajka noqon doono.

4. Waxaan qabaa su'aal kusaabsan casharadee lano diray, yaa kala hadlaa? Wax ku barashada guriga way adkaan kartaa, macallimiinteenu waxay ku dalaali doonaan inay noqdaan kuwo is bedbeddeli kara oo la qabsan kara xaalada inta ay kari karaan inay ku caawiyaan ardayda. Wac ama email u soo dir macallinkaaga iyo / ama wac iskuulka oo weydii inaad la hadasho maamule.

5. Sidee ardaydu ula qabsan doonaan casharadaas aan la barin? Qeyb ahaan iskuulka, waxaan la shaqeynay mas'uuliinta si aan u qorsheyno istiraatiijiyad lagu wajahayo wixii waxbarasho ah ee ka maqan ardayda marki ku noqdaan fasalka.

6. Sidee bay macalimiinta u darajayn doonaan ama u qiimeyn doonaan waxbarashada guriga? Macallimiintu waxay mas'uul ka noqon doonaan qiimeynta horumarka ardayga iyo ka warbixinta horumarkooda oo ay ku jiraan iyo meeleynta fasalka ugu dambeeya. Macallimiintu waxay had iyo jeer bixin doonaan jawaab-celin ku saabsan shaqada ardayga si loo hubiyo inay fahamsan yihiin waxbarashada iyo casharada loo baahan yahay. Waxaan aaminsanahay xirfadnimada macallimiinteena iyo hoggaamiyeyaasha waxbarashada inay qiimeyn karaan horumarka ardaydooda, si walba u yahay jawiga waxbarashada lagu jiro, waxayna go'aaminayaan buundooyinka ugu dambeeya lagu qori doonta kaarka warbixinta natiijooyinka.

7. Ilmahaygu wuxuu ku jiraa fasalka 6, 9 ama 12. Miyay qasab ku tahay inay qoraan Imtixaanka Achievement Test (PAT) ama Imtixaanka Dibloomada (DIP) bisha Juun? Maya. Imtixaanada PAT iyo DIP waa la joojiyey sannadkan.

8. Wiilkeyga / gabadhayda ma dooran karaan inay galaan Imtixaanka Dibloomada ee Juun? Maya. Imtixaanada shahaadiga ah ee bisha Juun 2020 ee ardayda guud wa la baajiyay.

9. Ilmahaygu ma u gudbi doonaa fasalka xiga? Haddii ardaygu ku socday wadada baasitaanka illaa 15ka Maarso iyo kahor, way gudbi doonaan. Hadu ardayga baasi lahayn markii fasalada la joojiyay, waxaa la siin doonaa fursad ay ku horumariyaan calaamadooda iyagoo dhammaystiraaya shaqada lo diray guriga. Macallimiintu wali waxay diyaar u yihiin si ay uga wada hadlaan horumarka ardayda. Haddii aad ka welwelsan tahay xaaladda ilmahaaga fadlan wac iskuulka oo weydii inaad la hadasho macalimiinta, maamulaha dugsiga, ama hadu yahay ardayda dugsiga sare,la hadal la-taliyayaasha dugsiga sare.

10. Sidee ardayda Fasalka 9 u dooran doonaan koorsooyinkooda dugsiga sare? Ardayda Fasalka 9 ee u gudbaya Fasalka 10 waxaa caawin doona macallinka iyo kooxda isdiiwaangelinta dugsiga si loo hubiyo in isdiiwaangelinta koorsada loo sameeyo sida danaha ugu wanaagsan ee ardayga. Iskuul walba wuxuu bilaabayaa xulashada koorsada 11-ka May. Wixi Faahfaahin kale booqo beejajka internetka ee iskuulka.

11. Ilmahaygu wuxuu ku jiraa fasalka 12. Mu qalin jibinaaya? Haa, hadu u ku socdi dariiqyadii ay ku dhammaystiri lahaa waxyaabaha looga baahan yahay qalinjabinta dugsiga sare. Macallimiinteenu waxay diyaar u yihiin inay ku caawiyaan ardayda waxyaabaha ay u bahan yihiin sidee si guul leh uga gudubaan dugsiga sare.

12. Arday kasta ma heli doonaa kaarka warbixinta natiijada ugu dambeeya? Haa. Sida ay u ekaan doonaan, iyo sida oo u yimaan doona kaarka, waxay kuxirantahay fasalk uu yahay.

Koorsada Fasalka 7-9 Farshaxanka Luuqadda Ingiriisiga Farshaxanka Luuqada Fransiiska Cilmiga Bulshada (social studies) Sayinska Xisaabta **Koorsada Fasalka 10-12** Farshaxanka Luuqadda Ingiriisiga Farshaxanka Luuqada Fransiiska Sayniska cilmiga bulshada Xisaabta Bayoolaji Kimistariga Sayniska Fiisigiska Koorsooyinka Looga Baahan Yahay Qalinjabinta	Ardayda waxay fursad u leeyihiin inay sare u qaadaan buundooyinkooda meeshii ay ku joojiyaan 15-kii Maarso. Macallimiintu waxay wareejin doonaan shaqooyinka waajib aan dhammeystirnayn oo la xilsaaray kahor joojinta fasalada. Ardayda waxaa laga filayaa inay ku dadaalaan wax ka qabashada shaqada ay macallimiintu bixiyeen. Waa muhiim in arday kastaa sameeyo dadaalkiisa ugu fiican nashaadaadka wax-barashada ee gurigiisa la diray iyo Dhammaan shaqooyinka oo dhan waa in la diraa ugu dambayn Juun 16-keeda. Sanduuqa imtixaanka finalka ah ee PowerSchool waxaa dib loogu magacaabi doonaa "Wax barashada Guriga" dhammaan shaqooyinka ka dambeeya Maarso 15-keeda ayaa lagu dari doonaa halkas. Macallimiinta ku sugan qeyb walba waxay qorsheyeen inay si wada jir ah u shaqeeyaan, waxayna sidoo kale adeegsan doonaan hal qaab ay ku qiimeeyaan maado walba. Iyadoo qoraal gaar ah jirto waxa lagu qori doona qoraal kale oo COVID 19 ah kaarka warbixinta natiijooyinka oo sheegayo in dhammaan ardayda FMPSD casharada aasaasiga ah kaliya la baray wixii ka dambeeyay Maarso 15-keedii. Ma jiri doonaan qiimeyn / imtixaan final ah bisha Juun. Qiimeyntu waxay dhici doontaa inta lagu jiro waqtiga waxbarashada guriga.
Fasalada 7-12 CTS, non-core	-natiijooyinka wuxuu ku salaysnaan doonaa bisha Maarso 15-keeda. Waxaad haysataa FURSAD inaad horumariso oo aad la shaqeyso macalinkaaga sida isku kobciso.